

# 30

## MAALIN

### RAMADAAN & ADIGA

Talooyin **dhaxal Gal ah** oo Ku saabsan Sidii aad uga faaidaysan lahayd **Bisha Barakaysan** ee Ramadaan.

WEHELKA AKHRISTAHA

XIKMA BOOKS

2025

# 30 MAALIN

## RAMADAANTA IYO ADIGA

Talooyin dhaxal gal ah oo ku saabsan sidii aad uga faa'inaysan lahayd bisha barakaysan ee **Ramadanta**.

**Xikma Books**

**2025**



## HORDHAC

Dhammaan ammaan iyo mahadnaqba waxaa iska leh Allah SWT, Eebbaha Caalamka. Waan u mahadcelinaynaa, caawimaad iyo cafisna waan weydiisanaynaa. Waxaan dhamaanteena inoo waydiinayaa caafimaad inuu inagu gaarsiiyo bisha barakaysan.

Bisha Ramadaana waxa ay leedahay Fadli aad iyo aad u weyn, waana fursad sanadkii hal mar soo marta dadka Muslimiinta ah, ayna tahay inaan ka faa`iidaysano Diinteenna Islaamka ah, Bisha Ramadaan aad iyo aad ayay u karaameysay waxayna geesay Bishaan boos aad uweyn.

Ramadan waa bil barakeysan oo qof walba uu heli karo fursad uu Alle ugu dhawaado. Waa waqti cibaado, is-bedel nafsi ah, iyo dib-u-eegis nolashaada ah. Si aad uga faa`iidaysato, waxaad u baahan tahay qorshe iyo niyad-sami.

Haddii aad si wanaagsan u qorsheysato, waxaad heli doontaa Ramadan aad ku xasuusan doonto sida bil aad noloshaada ku bedeshay. Bishan waxaa ku jira

Habeenka laylatul qadriga waxa uu ka khayr badan yahay kun bilood (yacni in Alle lagu caabudo habeenkaas ayaa ka khayr badan in la caabudo kun bilood oo ah 83 sano iyo 4 bilood) Rasuulkuna SCW isagoo fadliga habeenkaas ka hadlaya ayuu wuxuu yiri: “Qofkii Laylatul-Qadriga kaca (yacni habeenkaa cibaado sameeya) isagoo aaminsan, ajar iyo xasanaadna Ilaahey ka dalbanaya waxaa loo dhaafayaa dambigiisii hore. Waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim. Ha iloobin in aad go’aansato sidii aad uga faa’iidaysan lahayd



## BISHA RAMADAAN KAHOR

Sidii aan horayba hordhaca ugu soo sheegnay Diyaar garowgaagu inta uu le'egyahy ayey noqon fursadaada ka faaidaysashadu Bishaan Barakaysan ee Ramadaan taas oo Allh ku waajib yeelay Adoomadiisa sida uu rabbi SWT inoo sheegay.

من الَّذِينَ عَلَى كُتُبٍ كَمَا الصِّبْيَانُ عَلَيْكُمْ كُتُبٌ آمَنُوا الَّذِينَ أَيُّهَا يَا تَعَالَى اللَّهُ قَالَ  
﴿ تَتَّقُونَ لَعَلَّكُمْ قَبْلَكُمْ ﴾ [البقرة:183]

sidaa awgeed ramadaan kahor waxaan kugula talin lahayn inaad raacdid ama wax ka qaatid talooyinka si ay ramadaantaadu u noqoto mid aad u aydo.

1. **U diyaargarow Ramadan** – Ducayso Ilaahay waydiiso inuu cimrigaaga dheereeyo si aad u gaadho bisha barakeysan ee Ramadaan, kuuna barakeeyo, kaagana aqbalo camalkaaga suuban, una dhaaf dambiyadaada. Sidoo kale Jadwal cibaado samayso dajisona yoolasha aad rabto inaad gaarto bisha ramadaan.
2. **Soon sunne ah samee Ramadan ka hor-** (sida Isniin & Khamiis), isku day inaad soonto si jirkaaga uu ula qabsado soonka bisha Ramadaan.
3. **Ha dhafrin Habeenkii** – Naftaada sii bar inaad xilli hore seexato soona kacdo xiliga salaatu laylka si aysan kuu dhibin inaad soo kacdo xiliga suxuurta iyo tahajudka.
4. **Qur'aan akhris sii bilow haddii aanad jadwal Quraan akhris horey u lahayn-** hadda bilow si Ramadaan markay timaado ay kugu fududaato.

5. **Baro soonka iyo Axkaamta ku saabsan-** waa waajib inaan barano cilmiga soonka ku saabsan maantana wax walba internet ayey ku jiraan. Dib u akhri axkaamta soonka, fadliga Ramadaanka, iyo ducooyinka muhiimka ah.
6. **Cafi cid kasta oo aad wax ka tabanayso Ilaahay dartiis u cafi.**
7. **coffe-ga iska yaree-** si aad uga fogaato madax-xanuunka maalmaha hore ee Ramadaan.
8. **Tawbad keen dhab ah la imow** – Ka toobad keen dhammaan dembiyada, oo Allah ka bari inuusan kugu celin dembiyadaas, ilaahay waa danbi dhaafe naxariis badan. si uu cimrigaaga u dheereeyo si aad u gaadho Ramadaan, uu kuu barakeeyo, uu ka aqbaloo camalkaaga suuban, una dhaafo dambiyadaada.
9. **Yaree isticmaalka baraha bulshada** sida Facebook, Tiktok, iyo WhatsApp – Waqtigaas Qur’aanka, xuska Allah iyo salaad u hur.
10. **Sadaqada sii qorshee** – isku day inaad qorshayso sadaqada bisha ramadaan inta aan la gaarin kadibna u qaybi 30 cisho maalin walba qorshaheedi bixi markaas, taasi haday kugu adagtahay qayb qaado afurinta dadka aan awoodin afurka intii awoodada ah ku darso.

## RAMADAANKA DHEXDIISA

1. **Habeenkii xilli hore seexo,suxuur kadibna ha seexan-tani** waxay kaa caawinaysaa inaad si wanaagsan bisha uga faa`iidaysto.
2. **Haka tagin Suxuurta** – Suxuurtu waa barako, waana muhiim inaad cunto cuno caafimaad leh.
3. **Samee Jadwal Qur'aan Akhris** – Qorshayso inaad Qur`aanka khatino mar ama badiso akhriska Qur'aanka.

Kani waa Jadwal fiican oo aad raaci kartid Bisha Ramadanka, kuna anfici doona



**Habka Qur'aanka aad ku dhamayn kartid 30ka jus 30almood**

Salaada subax kadib : 4 bog

Salaada duhur kadib : 4 bog

Salaada casar kadib : 4 bog

Salaada maqrib kadib : 4 bog

Salaada cishe kadib : 4 bog

**□Habka aad ku dhamayn kartid 30ka jus 15 bari**

Salaada Subax 8 bog

Salaada Duhur 8 bog

Salaada Casar. 8 bog

Salaada Maqrib 8 bog

Salaada Cishe 8 bog

**□Habka aad ku dhamayn kartid 30ka jus 12 malmood**

Salaada Subax. 10 bog

Salaada Duhur 10 bog

Salaada Casar 10 bog

Salaada Maqrib 10 bog

Salaada Cishe 10 bog

**□Habka aad ku dhmayn kartid 30ka jus 10 malmood**

Salada Subax 12 bog

Salaada Duhur 12 bog

Salaada Casar 12 bog

Salaada Maqrib 12 bog

Salaada Cishe 12 bog




**□Qaybtaan waxaa loogu talagalay dadka Hankoodu aadka usareeyo waxay ku dhamayn karaan 30ka jus 6 maalmood**

|                |        |
|----------------|--------|
| Salaada Subax  | 20 bog |
| Salaada Duhur  | 20 bog |
| Salaada Casar  | 20 bog |
| Salaada Maqrib | 20 bog |
| Salaada Cishe  | 20 bog |

1. **Ilaali Taraawiixda iyo Salaadaha Sunnaha** – Ha moogaan salaadaha sunnaha iyo taraawiixda
2. **Qorshee Maalintaada** – Habeen kasta u samee qorshe maalinta xigta si aan waqti kaaga dhummin bishan.
3. **Xooji Xuska Allah (Dhikr)** – Ku dedaal inaad had iyo jeer xusto Allah.
4. **Hagaaji Cuntadaada** – Afurka iyo suxuurtu ha noqdaan kuwo caafimaad leh,ka fogow cuntooyinka caafimadka lahayn,waxay kaa dhigayaan mid daalan oo aan wax qabsan Karin.
5. **Ka Qaybgal Muxaadaroooyinka** – Ka qaybgal duruusta diininga ah,tafsiirka Quraankana wax ka baro bishaan.
6. **Ka Faa'iidayso Waqtiyada Ducada La Aqbalo** – Waqtiyada ducada la aqbalo ha dayicin,sida waqtiga suxuurta waqtiga Afurka, Inta u dhaxeysa Aadanka iyo Aaqinka, Maalinta Jimcaha, gaar ahaan saacadda ugu dambaysa ee galabta.

- 7. Ka Faa'iidayso Waqtiga Subaxda** – Waqtiga subaxda waa xiliga kaliya Nabiga (scw)Ilaahay inoo waydiiyey inuu noo barakeeyo barako iyo nimco weyn ayaa ku jirta waana wakhti ay dhamaan dadka guuleystay ka siman yihiin iney shaqaystaan. waa waqti aad howlaha ku muhiimka ku qabsan karto ka fogow inaad seexato bacdal salad subax.



## **TOBANKA DANBE EE BISHA RAMADAAN**

Haddii culimadu isku waafaqeen in bisha Ramadaan ay bilaha oo dhan ugu fadli badan tahay, sida oo kale waxa ay isku waafaqeen in tobanka danbe ay ugu sii fadli badan yihiin.

Maadaama bishii Ramadaan ay sii idlaanayso, qofka haleela ee wanaajiya dhammaadkeeda waxa uu qaandhabayaa gaabiskii ku yimi bilawgeeda. Waxaaba laga yaabaa in barakada Ramadaan ay ku jirto dhammaadkeeda, waayo camalladu kama soo hadhaan gunaanadka.

Waxyaabaha ay la soocan yihiin tobankan danbe iyo sida uu Nebigu scw uga faa'idaysan jiray.

Ilaahay SWT waxa uu tobankan danbe ku gaar yeellay waxyaabo aan lodkood laga helaynin, Nebiguna scw waxa uu samayn jiray camallo aanu xilliyada kale samayn jirin, waxaana ka mid ah:

### **1- dadaal badni.**

Nebigu scw waxa uu ahaa mid ku dadaala camalkaan, Caa'isha RC waxa ay leedahay: "Rasuulku scw waxa uu ahaa mid u dadaala tobanka danbe si aanu qayrkood u dadaali jirin". Muslim baa soo wariyay.

Nebigu scw waxa uu habeenkii ku noolayn jiray noocyada kala duwan ee cibaadada, lehna Salaad, Xus, iyo akhrinta Quraanka. Caa'isha RC waxa ay leedahay: "Rasuulku scw marka la galo tobanka danbe waxa uu ahaa mid habeenka nooleeya, toosiyana ehelkiisa, waana uu dadaali jiray, guntiga ayuu dhiisha iskaga dhigi jiray".

Nabigu scw habeennadan qoyskiisa ayaa uu kicin jiray, si ay Salaad iyo xus ugu oogaan. Ibnu Rajeb waxa uu yidhi: "**Rasuulku scw marka la gaadho tobanka danbe qof kasta oo qoyskiisi ka mid ah hurdada ayaa uu ka toosin jiray**".

Guntiga ayuu dhiisha iskaga dhigi jiray, waxaa laga sarbeebayaa: jimaaca iyo dumarka ayaa uu ka dheeraan jiray.

## **2- Ictikaafka.**

Bukhaari iyo Muslim waxa ay Caa'isha ka soo wariyeen: **Nebigu scw in uu ictikaafi jiray 10ka danbe ee Ramadaan, ilaa uu Ilaahay ka oofsaday, dabeetona, xaasaskiisa ayaa ictikaafay isaga ka dib..**

Ictikaafka waxa af ahaan la yidhaahdaa: in meel lagu negaado, naftana lagu xidho. Sharci ahaanna waxa la yidhaa: "qofi ku negaado masjidka, tilmaan la yaqaana uu ugu negaado".<sup>1</sup>

---

<sup>1</sup>

Asalkiisuna waa in adduunka laga nasto oo cibaado loo go'o, naftana laga jaro ku mashquulka waxyaabaha aan daacada ahay.

Qofkuna waa in uu la dheeraada, in dadka soo booqanaya ay ka jeediyaan cibaabada iyo xuska. Qofkuna waxa uu u bixi karaa waxyaabaha uu u baahan yahay, sida cuntada iyo cabitaanka, waa haddii aanu masjid ka helaynin uuna waayo cid u keenta.

### **3- Waqti kasta ka faai'dayso.**

Abuu Hurayra RC waxa uu yidhi: "Nebigu scw waxa uu reebay in soonka la xidhiidhiyo - yacni: la is raaciyo laba maalin ama ka badan afur la'aan - markaasaa nin muslimiinta ka mid ah ku yidhi: Rasuulkii Ilaahayow adigu waad xidhiidhisaayee? Markaasuu yidhi: kiinnee ayaa ila mid ah? Aniga Ilaahay ayaa i quudiya ina waraabiya".

Quudintaasi waa mid ruuxi ah, ee ma aha cunnadii iyo cabitaankii caadiga ahaa. Nebigu scw waxa uu saxaabada xidhiidhinta soonka uga reebay; si aanay uga taag darrayn cibaadada iyo daacaadka.

### **4- Raadi laylatul qabriga. (Laylatul Khadar).**

Nebigu scw waxa uu u ictikaafi jiray si uu cibaadada ugu faaruqo, iyo raadinta laylatul-qadriga, habeenkaas barakaysan, ee Ilaahay camalka la sameeyo ka dhigay mid ka khayr badan kun bilood.

Ilaahay waxa uu yidhi:

“□ لَيْلَةُ الْقَدْرِ خَيْرٌ مِنْ أَلْفِ شَهْرٍ”.

**"Habeenka laylatul-qadrigu waxa uu ka khayr badan yahay kun bilood".**

Habeenkan waxa la qaddaraa dhammaan qaddaryada khalqiyada ee sannadkaas, markaasaa waxa la qoraa kuwa noolaan doona iyo kuwa dhiman doona, kuwa liibaaney iyo kuwa hoogay, ajasha iyo arsaq.

Habeenkaas waxa la furaa albaabada Samada, ducada ayaa Ilaahay aqbalaa. Habeen nabadeed, waayo Ilaahay waxa uu caalamka la doonayaa nabadgelyo, bulsho nabad qabta. Qalbiyo iyo nafa nabad qaba. Xidhiidho nabad qaba.

“سلام هي حتى مطلع الفجر”.

**"Waa nabad habeenkaasi ilaa waagu ka beryayo".**

Ilaahay SWT ma cayimin habeenkaas si addoomadu ay cibaadada u badiyaan.

Se habeenkaas waxa uu ku jiraa tobanka danbe, waxaana loogu rajo badan yahay habeennada tirada is -dheer, sida 21, 23, 25, 27, iyo 29.

Bukhaari iyo Muslim waxa ku yimi in Nebigu scw yidhi: **"ka raadiya tobanka danbe ee Ramadaan"**.

Rag badan oo saxaabada ka mid ah ayaa riyo ku arkay, in habeenka laylatul qabrigu galay 7da habeen

ee ugu danbeeya bisha Ramadaan. Markaasaa Rasuulku scw yidhi: " waxa aan arkaa in aad isku waafaqdeen todobada danbe, ee qofkii raadinaya ha ka raadiyo 7da danbe".<sup>2</sup>

Waxaa loogu rajo badan yahay habeenka 27-aad, Ibnu Cumar RC waxa uu Rasuulka scw ka soo wariyay in uu yidhi: "Habeenka laylatul-qadrigu waa habee ka 27-aad".<sup>3</sup>

Habeennadan qofku waa in uu badiyaa ducada, waayo waa la aqbalaa, Caa'isha RC ayaa rasuulka weydiisay duco ay ku ducaysato haddii ay waafaqdo habeenka laylatul qabriga, markaasuu yidhi: dheh: اللهم إنك عفو تحب العفو فاعف عني.<sup>4</sup>

Ilaahayow Ramadaan iyo laylatul qadriga na gaadhsii. Ilaahayow naga dhig kuwa aad Naarta ka xooraynayso.

## **1:Soonka wadaaca ah soon**

Nabiga (scw) waxa uu yiri>Qofka sooma Ramadaan,dabadeedna raaciya yacnii sooma lix ka mid ah bisha soon fur,wuxuu la ajar yahay sanad soonkiis.

---

## **2:Soonka sunnaha joogtee ramadaan ka dib**

Go`aanso inaad soonto Isniinta iyo Khamiista ama saddex maalmood inaad soonto bil walba.

Haddii aad dooratid in aad bishii saddex maalmood soontid,waxaa fiican in aad samayso sidii uu Nabi Muxammad (scw) kugula dardaarmay oo ah inaad soonto “Maalmaha cad-cad”-13ka,14ka,iyo 15ka bil walba bilaha Islaamka.

## **3:Salaatu Laylka sii wad**

Ilaahay SWT aayado kala duwan oo Qur`aanka ayuu ku booriyey in mu`miniinta in ay ka tagaan gogosha inta aan waagu baryin,tukadaana Salaatu laylka.

Maadaama aan soo kici jirney habeen walba xiliga suxuurta sii wad inaad xiligaas soo kacdo oo aad tukato salaatu laylka.

Xiliga salaatu laylka waa saacadaha Nabiga (scw) sheegay Ilaahay samada aduunyada ayuu yimaadaa wuxuuna soo dagaa soo dagitaan u qalma,markaas buu Ilaahay oranayaa ayaa wax i waydiisanaya aan siiyee,ayaa tobad keenaya tobada aan ka aqbalee,ayaa danbi dhaaf doonaya danbigiisa aan dhaafee,ka waran xiligaas haddaa kacdo oo aad ducaysato.



#### **4: Wardigaagii Qur`aan akhriska sii wad**

Qur'aanka Kariimku waa hadiyadda ugu weyn ee Alle noo soo dejiyey si aan ugu noolaanno nolol hanuunsan oo barakaysan. Akhrintiisa, xifdintiisa, iyo ku camal faliddiisu waa dariiqo lagu kasbado ajar weyn iyo raalli ahaanshaha Rabbigeyn Subxaanuhu Watacalaa. Haddaba aan Quraanka wehelkeena.



## **5: Sii Wad Horumarinta Naftaada**

Ramadaan waa xilli is-bedel wanaagsan, sidaa darteed sii wad horumarinta naftaada Ramadaan kadib ha noqoto barashada diinta, sadaqa, cilmi kororsi, ama horumarinta xirfadahaaga.

### **Gabagabo**

Xikma Books waxay kuu rajeyneysaa adiga iyo qoyskaaga inaad si nabad ah oo barwaaqo ah ku gaartaan kuna dhamaystaan bisha barakaysan, Ilaahay kaa mid dhigo kuwa jirkooda cadaabka laga xoreeyo ehelu janadana ka mid noqda.